

# Foomka I-9, Xaqiijinta Xaq u lahaanshaha Shaqada Warqada Warbixinta Shaqaalaha



U.S. Citizenship  
and Immigration  
Services

**1. Waa maxay ujeedada foomka I-9?** Sharciga fedraalka wuxuu ubaahanyahay badrooniyaada in ay xaqiijiyaan aqoonsiga iyo ogolaanshaha shaqada ee shaqaalaha cusub iyo si dib looga xaqiijiyo ogolaanshaha shaqada oo kaliya xaaladaha qaarkood ee taariiq hadhaw ah. Badrooniyaada waa in ay isticmaalaan foomka I-9 si aad usameysid midaan. Badrooniyaada wuxuu ku weydiinayaa in aad buuxisid Qeybta 1. Fadlan Dib u eeg tilmaamaha iyo si cad u daabac.

**2. Yaa haayo Foomka I-9?** Badrooniyaada ayaalaha ayaa haynaya Foomka I-9 oo buuxo waa in lala wadaagaa hay'adaha dawlada qaarkood markii la codsado. Saraakiisha ka timid Waaxda Guriyeynta Amniga, oo Xafiiska La taliyaha Gaarka ah ee Socdaalka-La xiriira Dhaqamada Shaqada aan Daacada aheyn (OSC) oo Waaxda Cadaalada, iyo Waaxda Shaqaalaha laga yaabo in ay baaraan foomka badrooniyaada I-9.

**3. Miyaan buuxiyaa wax walba oo ku yaalo Qeybta 1?** Maya. Sedexda qeybood oo iqtiyaarka ah waa: (1) Lambarka Amniga Bulshad, (2) Cinwaanka I-meelka, iyo (3) Lambarka Taleefonka. Hadii badrooniyaada isticmaalo E-Verify, waa in aad sheegtaa Lambarkaaga Amniga Bulshada. Hadii aad sheegtid cinwaanka i-meelkaaga iyo lambarka taleefonka, E-Verify ayaa usuurto galeyso in ay ku siiso warbixin muhiim ah oo la xiriirto dacwadaada E-Verify.

**4. Ma inaan buuxiyaa Qeybta 2 ama Qeybta 3?** Maya. Qeybta 2 iyo Qeybta 3 waxaa dhameystiray badrooniyaada.

**5. Foomka I-9 malagu heli karaa luuqado kale?** Haa. Foomka I-9 waxaa sidoo kale lagu heli karaa Isbaanish oo isticmaalka Puerto Rico. Meel ka baxsan Puerto Rico, Nooca Isbaanishka waxaa loo isticmaali karaa kaliya in lagu caawiyo badrooniyaada iyo shaqaalaha dhameystiraan foomka luuqada Ingiriiska.

**6. Malaga yaabaa in uu i caawin karo qof fahmayo Ingiriiska in uu iibuuxiyo Foomka I-9?** Haa. Waad weydiin kartaa qof in uu kugu caawiyo buxinta foomka. Tusaalooyinka guud waa meesha aad uga baahantahay foomka in lagu turjumo ama aad u baahantahay caawin qorista ah warbixintaada. Qofka kuu turjumo ama kuu buuxiyo foomka adiga waa in aad dhameystirtaa “Diyaarinta iyo/ama shahaadada Turjubaanka” oo Foomka I-9. Si kastaba, adiga gaar ahaan waa in aad saxiixdaa Qeybta 1.

**7. Warqadee ayaan u baahanahay in aan tusiiyo badrooniyaada?** Waxaad u baahantahay in aad tusto badrooniyaada waraaqo kaimaado “Liiska Waraaqaha La ogolaanayo.” Liiska wuxuu qeyb ka yahay Foomka I-9. Adiga go'aanso warqada ama waraaqaha aad ka tuseyo liiska. Badrooniyaada ma ku weydiin karo ama kaa rabi karo in aad tusto waraaqo gaar ah.

**8. Ma u baahanahay in aan tusiiyo badrooniyaada hal ama labo waraaqo?** Waxay ku xirantahay. Shaqaalaha qaarkood waxay doortaan in ay ka tusaan hal waraaq “Liiska A” si loo cadeeyo **Labadaba** aqoonsiga iyo ogolaanshaha shaqada. Shaqaalaha kale waxay doortaan in ay tusaan waraaq isku dar ah – hal “Liiska B” oo muujinayo aqoonsigooda iyo hal “Liiska C” oo muujinayo ogolaanshaha shaqada. Liiska oo dhameystiran oo waraaqaha aad u isticmaali kartid, ka fiiri Liiska Waraaqaha la Ogolyahay.

**9. Maxaa dhacaayo hadii aanan buuxin Qeybta 1 iyo/ama waraaqaha la ogolyahay in la dhiibto?** Hadii aadan dhameystiran Qeybta 1 ee Foomka I-9 iyo/ama waraaqaha la ogolyahay in la dhiibto, badrooniyaada wuu joojin karaa shaqadaada.

**10. Dhib miyaan la kulmi karaa hadii been ku sheego foomka?** Haa. Waxaa laga yaabaa in laguugu eedeeyo edeymo fal dambiyeed hadii aad been sheegtid ama aad keentid waraaqo been abuur ah oo Foomka I-9.

**11. Yaan wici karaa hadii aan suuqa qabo, ama hadii aan umaleeyo badrooniyaada in cadaalad daro igula dhaqmayo oo ku saleysan asalka wadankeyga ama heerka muwaadinnimada?** Wixii su'aalo ah oo Foomka I-9, ka soo wac Muwaadaniinta Mareykaniyo Adeegyada Socdaalka ee 1-888-464-4218. Hadii aad aaminsantahay in si cadaalad daro laguugula dhaqmay oo kusaleysan asalka wadanka ama muwaadinnimada ama heerka socdaalka, ama aad su'aalo ka qabtid xaquuqdaada, soo wac Xafiiska la Taliyaha Gaarka ah ee Socdaalka la Xiriira Dhaqamada Cadaalad darada Shaqada ee 1-800-255-7688 (caawinta luuqada waala helayaa) ama 1-800-237-2515 (TDD).

**12. Sidee ayaan u baran karaa wax badan oo ku saabsan Foomka I-9 iyo xaquuqdeyda iyo waajibaadyadeyda sida shaqaale?** Fadlan booqo Bartamaha I-9 ([www.uscis.gov/I-9Central](http://www.uscis.gov/I-9Central)). USCIS sidoo kale waxay bixisaa siminaaro bille ah oo xaquuqda shaqaalaha iyo waajibaadyada. OSC sidoo kale waxay bixisaa siminaar bilash ah oo shaqaalaha afka Ingiriiska iyo Isbaanishka, iyo balanta waxaa laga heli karaa websaydka OSC ([www.justice.gov/crt/about/osc](http://www.justice.gov/crt/about/osc)).